# XAFIISKA QARAMADDA MIDDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIA (UNSOM)

**WAR SAXAAFADEED 16/2014**

## Ergeyga Qaramada Midoobay ee Soomaaliya oo amaanay warbaahinta kuna baaqay in la ilaaliyo lana dhowro xoriyadda saxaafadda

**Muqdisho, 3 Maajo 2014 –** Iyadoo Maalinta Xoriyadda Saxaafadda looga dabbaaldegayo adduunka oo idil, Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya (SRSG), Nicholas Kay, ayaa amaan u soo jeediyay saxafiyiinta Soomaaliyeed ee naftooda ku waayay iyagoo waajibkooda gudanaya. Wuxuu ku baaqay in la wada ilaaliyo lana dhowro xoriyadda saxaafadda, wuxuuna amaanay warbaahinta firfircoon oo sii kobceysa ee ka jirta Soomaaliya.

"Soomaaliya waxay hadda ka soo baxaysaa tobaneeyo sanno oo colaad ah, laakiinse weli waxay ka midtahay meelaha adduunka ugu halista badan ee uu wariye joogo. Waxa aad u muhimsan in la helo saxaafad firfircoon, madaxbanaan, oona kala duwan. Wariyeyaashu waxay cayaarayaan kaalin mug leh iyagoo ay Soomaalidu ay waddo ajendo hanweyn oo lagu dhisayo dowladda iyo nabaddaba. Saxaafad xor ah waxay dadka siisaa fursad ay ku helaan xogta ay u baahanyihiin si ay u gaaraan go'aanada muhimka u ah noloshooda. Waxayna sare u qaaddaa wacyiga ay u leeyihiin arrimaha saameynta ku leh noloshooda, qoysaskooda iyo bulshadooda, waxayna dadka gacan ku siisaa si ay dowladda iyo mas'uuliyiinta ugula xisaabtamaan falalka ay ku kacaan", ayuu yiri Ergayga Gaarka ah Nicholas Kay.

"Waxaan amaan u soo jeedinayaa wariyeyaasha Soomaaliyeed ee geesiyada ah oo naftooda ku waayay ama la soo weeraray iyagoo gudanaya waajibkoodaa. Waxaan aragnay inay aad hoos ugu dhaceen weerarradii loo geysanjiray wariyeyaasha sannadihii dhowaa, laakiin hawshu weli fara kama qodna ee waxaa weli haray in wax badan la qabto. Xoriyadda saxaafadda ka jirta Soomaaliya weli way dabacsantahay, waana in la ilaaliyaa," ayuu raaciyay Ergayga Gaarka ah Nicholas Kay.

"Waxaan soo dhoweynayaa wadatashiga u dhexeeya bahda warbaahinta Soomaaliyeed iyo Dowladda Federaalka si loo dhammaystiro sharciga warbaahinta ee cusub. Sharcigan wuxuu noqon doonaa tallaabo muhim ah ee loo qaaday tixgelinta mabaadi'da asaasiga ah ee xoriyadda saxaafadda. Sharciga cusub waa inuu awood siiyaa wariyeyaasha si ay qayb muhim ah uga geystaan nabadda iyo xasilloonida Soomaaliya."

*FG: Waxaa wariyeyaasha lagu wargelinayaa in 18 qof oo ah hawlwadeeno warbaahinta ka shaqeeya lagu dilay Soomaaliya sannadkii 2012, 7 kalena lagu dilay sannadkii 2013 (xogta waxaa laga helay Ururka Saxafiyiinta Qaranka Soomaaliyeed)*

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Aleem Siddique
Tel: +254 41 350 6603 • Email: unsom-spokesperson@un.org
*Fadlan eeg rugta Internet-ka:*
**www.unsom.unmissions.org • @UNSomalia • facebook.com/UNSomalia**